

Maxaan u baahanahay in aan ka ogaado irbadaha xoojinta?



Tallaallada COVID-19 waxay dadka ka difaacayeen xanuunka daran iyo dhimashada COVID-19. Laakiin caabuqyada Delta iyo Omicron ee COVID-19 oo faafaya, dadka u qalma waxaa u habboon in ay hadda qaataan irbad xoojin oo dheeraad ah ee tallaalka COVID-19 si loo helo difaaca ugu badan.

Waa maxay irbad xoojin?

Xoojisooyinku waa irbad dheeraad ah oo tallaal si loo siyaadiyo awoodda iyo muddada difaaca. Waxay si khaas ah muhiim ugu tahay dadka ka weyn 50 sano iyo dadka leh xaalado caafimaad in ay qaataan xoojiso. **Irbadaha xoojinta waa bilaash.**

Ma u qalmaa irbad xoojin?

Qofkasta oo **5 sano jira ama ka weyn** waxaa habboon inuu qaato irbad xoojin.

Goormaan qaataa xoojiso?

Qof kasta oo 5 sano jira ama ka weyn waxaa habboon inuu qaato irbad xoojiso ah si uu ugu ilaalsanaado si buuxda:

- **5 bilood** kadib irbadda labaad ee Pfizer ama Modern (FIIRO-GAARA: Dadka jir difaacoodu hooseeyo waxaa laga yaabaa inay qaataan irbado saa'id ah. Qaado xoojiso 3 bilood kadib irbaddii labaad ee taxanahaaga koobaad.)
- **2 bilood** kadib tallaalkaagii koobaad hadaad qaadatay tallaalka J&J.

Tallaal xoojin ah oo noocee ah ayaan qaataa?

Waxaad qaadan kartaa nooca tallaalkaagii hore ama mid ka duwan. Tusaale, waxaad qaadan kartaa xoojiye Moderna ama Pfizer ah haddii aad horay u qaadatay tallaalka J&J .

&J tallaalkiisu waxuu leeyahay khatar hoose oo khalkhal xinjirow dhiig daran ah, khaasatan haweenka ka yar da'da 50. Tallaadada Pfizer iyo Moderna ma leh khatartaas, oo waa lagu taliyey intii la qaadan lahaa J&J dhamaan tallaalka hore amase kan baritaarka ah.

Xageen ka heli karaa tallaalka xoojinta?

Wac xafiiska dhakhtarkaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka si aad u ogaato hadii ay ku siin karaan ballan tallaal.

Isticmaal hagaha goobaha tallaalka ee Gobolka Washington si aad u heshid goob tallaal oo kuu dhow: <https://vaccinelocator.doh.wa.gov>.

Booqo goobaha tallaalka ee King County Tallaalada xoojinta ee aan u baahnayn ballan-qabsasho hore ayaa laga heli karaa dhamaan goobaha tallaalka ee King County. Waxaad halkaan ka heli kartaa liiska goobaha kingcounty.gov/vaccine/somali.

Hadii aad tahay naafo una baahantahay caawimaad si aad u hesho tallaalka xoojinta ee COVID-19, wac 206-477-3977 ama farriin ku dir publichealthaccommodations@kingcounty.gov.

Adeegyadee kale oo dheeri ah ayaa jira?

Gaadiid - Hadii aad u baahantahay gaadiid ku geeya goobta tallaalka, booqo bit.ly/vaxride (websaydhka waa Ingiriis keliya) ama wac 425-943-6706 (Isniin ilaa Jimco, 8:30 subaxnimo-4 galabnimo). Taabo nambar 5 si aad u heshid turjumaad.

Tallaalka Guriga - Si aad u codsato ballan tallaal oo guriga ah, wac Xarunta Wicitaanka COVID-19 ee King County 206-477-3977, 8 subaxnimo -7 galabnimo. Turjumaad ayaad heli kartaa. Su'aalo dhowr ah ayaa lagu weydiin si loo hubiyo inaad u qalanto.

Wixii macluumaad dheeri ah oo ku saabsan tallaalka iyo xoojiyeyaasha, booqo kingcounty.gov/covid/vaccine/somali.

